Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM)

Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya, James Swan

Warbixin uu Ergeyga uu Siiyey Golaha Ammaanka ee ku Aadan Xaaladda Soomaaliya

21-ka Agoosto 2019

Mahadsanid Marwo Madaxwayne iyo Xubnaha Golaha

Waxaan ku faraxsanahay inaan idin la hadlo markii ugu horeysay, tan iyo markii aan la wareegey mas'uuliyaddan bishii Juun. Waxaan rabaa inaan ku bilaabo inaan idin caddeeyo sida buuxda ee ay uga go'an tahay hirgelinta waajibaadka Hawlgalka Qaramada Midoobay ee Taageerada Soomaaliya ee uu goluhu ku ansixiyay Qaraarka 2461, iyo sidoo kale go'aannadii kale ee Golaha khuseeyey. Waxa kale oo aan rabaa in aan bilawga caddeeyo arrinta udub dhexaad u ah dhammaan waxa aan samayno ee ah mudnaanta isku-dhafka ah, oo ay ku jiraan xuquuqda aadanaha, haweenka, nabadda iyo amniga, ka-qaybgalka dhalinyarada, iyo ka mid noqoshada bulshada rayidka ah iyo arrimo kale.

Tan iyo markii aan Soomaaliya imid, waxaan ka mahad-naqayaa soo dhawaynta diirran ee ay ii fidiyeen dawladda Faderaalka, Dawlad Goboleedyada, iyo dhammaan shacabka Soomaaliyeed ee aan ku faraxsanaa in aan la kulmo. Waxa kale oo aan bogaadinayaa wada shaqaynta ilaa hadda saaxiibada Soomaaliya ee beesha caalamka, waxaanan rajaynayaa in aan sii xoojiyo. Waxaan si gaar ah ugu mahadcelinayaa la-talinta iyo wada-shaqeynta dhow ee Danjire Francisco Madeira, Ergeyga Gaarka ah ee Guddoomiyaha Golaha Midowga Afrika, waxaanan bogaadinayaa geesinnimada joogtada ah ee ay ciidamada AMISOM naftooda u hurayaan nabadda Soomaaliya.

Guddoomiye,

Tan iyo markii aan ka shaqo galay waddan aan si dhow xaaladiisa ula socday sanado badan, waxaan la dhacay calaamado badan oo muuqda oo horumar ah. Waxaan booqday mid kasta oo ka mid ah Dawladaha xubnaha ka ah Federaalka iyo 'Somaliland', goobahaa oo aan fursad u helay inaan maqlo aragtida madaxdooda iyo dadkooda. Socdaalkii aan ku soo maray dalka waxaan ku soo arkay tusaalayaal badan oo ka mid ah soo kabashada, horumarka, horumarinta amniga, iyo hay'adaha dowladda ee shaqeeya. Aad ayaan ula dhacay – oo xitaa i qiiro galiyay dulqaadka, dadaalka iyo geesinimada Soomaalida aan la kulmay.

Horumarkan ayaa marag u ah hiigsiga ajendaha - la gaari karo – ee nabad abuuridda iyo dowlad dhisidda, ee ay madaxda Soomaaliya ka go'an tahay. Soomaaliya iyo saaxiibadeeda caalamiga ah waxay aad u xiisaynayaan inay arkaan horumarkan oo horay u socda inta u dhaxaysa sanadkan ilaa iyo dhammaadka 2020-ka iyadoo loo marayo dib-u-habayn dastuuri ah; horumarka laga gaaray hawlgallada amniga iyo dib-u-habaynta laamaha amniga; hirgelitaanka deyn cafinta taasoo horseedaysa maalgelin la saadaalin karo ee horumarinta; iyo gaarsiinta doorashooyinka qaranka ee la filayo.

Waa in aan qirno guulaha laga gaaray hirgelinta waxyaabaha mudnaanta leh.

Hase yeeshe, fursadda lagu gaari karo horumarka dheeraadka ah ee arrimahan lagama maarmaanka ah ayaa sii yaraanaysa. Halbeegyada muhiimka ah waxay halis ugu jiraan inay dib uga dhacaan waqtiyada lagu heshiiyey. Horumar dheeraad ah ayaa laga yaabaa in dib loo dhigo iyada oo aan dib loo soo cusbooneysiin wadahadalada iyo wadashaqeynta dhammaan daneeyayaasha.

Dejinta dhabbaha lagu gaarayo yoolashan inta u dhaxaysa bishan ilaa iyo 2020 waxay u baahan doontaa dadaallo dheeraad ah dhowrka bilood ee soo socda. Tani waxay sidoo kale u baahan doontaa is-afgarad siyaasadeed iyo isu-tanaasul dhexmara madaxda Soomaalida ee heer qaran – mid fulineed iyo sharci-dejinba – iyo gaar ahaan dawladda dhexe iyo dawlad goboleedyada, oo ku saabsan sida ugu habboon ee lagu hormarin karo.

Waxaan isha ku haynaa shirka soo socda ee Madasha Iskaashiga Soomaaliya, bisha Oktoobar, kaasoo fursad siin doona Soomaaliya iyo saaxiibadeeda caalamiga ah inay ku heshiiyaan arrimaha mudnaanta waxqabadka leh iyo in la dardargeliyo horumarka laga gaarayo mudnaanta dowlad-dhiska Soomaaliya inta u dhaxaysa waqtigan ilaa iyo dhammaadka 2020-ka.

Marwo Madaxwayne,

Nidaamka doorashada qaranka ee 2020/21 waxa uu fursad si hufan loogu horumarinayo siinayaa geeddi-socodka dimuqraadiyeynta. Diyaar garow farsamo ayaa weli socda, waxaana nuqulka sharciga doorashooyinka dib u eegis ku haya baarlamaanka Federaalka, guddiga madaxa banaan ee doorashooyinka qaranka ayaa sidoo kale diyaarinaya diiwaan gelinta codbixiyayaasha.

Waxaan ku dhiirigelinayaa Golaha Shacabka in ay dedejiyaan dib u eegista iyo ansixinta hindise sharciyeedka doorashada, oo ay ku jiraan la tashiyo dheeri ah si loo helo taageero siyaasadeed ballaaran. Si taas loo gaaro, waxaan soo dhaweynayaa dib u soo celinta wadashaqeynta labada Aqal ee Baarlamaanka.

Waxaan sidoo kale Dowladda Federaalka ku boorinayaa in ay dhisto guddiga isu-duwidda amniga doorashada, si ay u horumariyaan qabanqaabada doorashada lagu xaqiijinayo.

Waxaan sidoo kale ku boorineynaa in la xoojiyo awoodda haweenka ee howlaha siyaasadda.

Xataa inta aan sugeyno doorashooyin heer qaran ah 2020/21, waa in aan fiiro gaar ah u yeelano geeddi-socodka doorashada ee Dawlad Goboleedyada. Waxaan si dhow ula soconaa arrimaha ka soo cusboonaada Galmudug oo taageero ka helaysa dowladda Federaalka Soomaaliya, halkaas oo

uu ka socdo shirka madasha dib u heshiisiinta. Waxaan dhiirigelineynaa dadaalkan si loo gaaro is-afgarad ballaaran oo ku saabsan hannaanka doorashada Galmudug.

Dhanka Jubaland, waxaan sii wadeynaa dhiirigelinta hal doorasho oo la isku raacsan yahay, la'aanteedna waxaa sii kordhaya khatarta xasilooni-darro haddii ay timaado natiijo la isku khilaafsan yahay. Qaramada Midoobay iyo saaxiibada kale ee caalamiga ah waxay ku cadaadiyeen dhammaan dhinacyada inay raadiyaan tanaasul wadadii lagu heshiiyey ee hore loo mari lahaa, laakiin, waan ka xunnahay, wakhtigu hadda waa mid aad u yar. Qalalaasaha ka jira Jubaland khatar kuma aha keliya guulihii laga gaaray dowlad goboleedkaas, balse sidoo kale waxaa jira arrimo badan oo muhiim u ah qaranka, oo ay ku jiraan u diyaar garowga doorashada 2020, dagaalka ka dhanka ah Al-Shabaab iyo ajandayaasha horumarineed.

Si kasta oo ay noqoto natiijada ka soo baxda Jubaland berri, waxaan ka codsanayaa dhammaan dhinacyada ay khusayso inay is-xakameeyaan, ka waantoobaan rabshadaha, wada hadalna lagu xalliyo cabashooyinka.

Sida ku xusan bilowga hadalkayga, waxaan booqday 'Somaliland' 27-ka iyo 28-ka Luulyo oo aan la tashi iyo is-xog wareysi la yeeshay madaxdeeda. Waxaan sii wadeynaa dhiirigelinta wadahadalka u dhaxeeya maamulada Hargeysa iyo Muqdisho, iyo kuwa kale, anagoo ka duulayna dadaaladii hore.

Marwo Madaxwayne,

Dastuurka Federaalka, marka la meelmariyo, wuxuu mideyn doonaa dhammaan aragtida shacabka Soomaaliyeed, isagoo si cad u qeexaya doorka ay ku yeelanayaan hay'adaha dowladda federaalka ah, iyo xiriirka ka dhexeeya dowladaha xubnaha ka ah federaalka.

Horumar ayaa laga gaaray geeddi-socodka dib-u-eegista farsamada, laakiin Soomaalidu waxay hadda u baahan tahay inay raadiso wada-hadal loo dhan yahay si heshiis looga gaaro arrimaha muhiimka ah ee taagan. oo ay ku jiraan saami awood qaybsiga, xiriirka dowladda iyo maamul goboleedyada, nidaamka dowladnimo, qeybsiga kheyraadka, iyo maqaamka Muqdisho.

Xaaladda ammaan ee Soomaaliya ayaa weli ah mid walaac weyn laga qabo. Weerarkii arxan darada ahaa ee Al-Shabaab ay ku qaadeen Xarunta Gobolka Banaadir 24-kii July waxa uu ahaa uur ku taalo xanuun badan oo ku saabsan khatarta ay argagixisadu ku hayso horumarka. Waxaan u duceynayaa dhibanayaashii weerarkan iyo weeraro kaleba.

Hase yeeshee, waxaa jira horumarro ammaan oo dhiirigelinaya. Ciidamada Ammaanka Soomaaliya, oo kaashanaya AMISOM, Qaramada Midoobay iyo saaxiibada caalamiga ah, ayaa horumar ka sameynaya dib u soo kabashada iyo xasilinta degaannada Shabeellaha Hoose, ee ku xeeran Muqdisho oo ay gacanta ku hayeen al-Shabaab. Hawlgalladan ayaa muujiyey waxtarka wada-shaqeyntan, waxaana ay muujiyeen sida ay uga go'an tahay ka qayb galayaasha muhiimka ah ee howl-galka amniga ee ku aaddan Habka dhammaystiran ee Amniga.

Hawlgalladu waxay si isku mid ah u taageerayaan hirgelinta Qorshaha Kala-guurka iyo Qaab-dhismeedka Amniga Qaranka iyadoo la horumarinayo dib-u-habaynta hay'adaha ee loogu

talagalay in lagu soo saaro, lana xirfadeeyo iyo in la joogteeyo ciidamada milateriga iyo booliiska Soomaaliyeed, iyo sidoo kale dhaqan gelinta sharciga iyo hay'adaha caddaaladda.

Marwo Madaxwayne,

Soomaaliya ayaa horumar joogto ah ka sameyneysa dhanka soo kabashada dhaqaalaha, waxaana socda dadaallada lagu hagaajinayo soo kabashada dhaqaalaha dalka iyo sidoo kale in ay cid walbo ka mid noqoto kobacan. Masuuliyiinta dawladdu waxay sameeyeen horumarro muhiim ah oo ku aaddan horumarinta waxqabadka maaliyadda iyo xoojinta dawladnimada. Meesha go'aanka ee hoos timaada Hindisaha Waddamada Faqiirka ah ee deymaha badan leh (HIPC) ayaa la arkayaa.

Dhanka kale, dhibaatooyinka bini'aadannimo ee Soomaaliya ayaa weli ah kuwa ugu daba dheeraaday adduunka. Hadda, 2.2 milyan oo Soomaali ah ayaa waxaa soo food saartay cunto yari aad u daran, 2.6 milyan oo kalena waa ku barokaceen gudaha dalka, kuwaas oo ka soo cararay colaado iyo abaaro.

Qaramada Midoobay iyo Dowladda Soomaaliya ayaa si wadajir ah u soo saaray Qorshe looga jawaabayo Saameynta Abaaraha oo lagu codsaday lacag dhan 686 Milyan oo Doollarka Mareykanka ah, taasi oo ku dhawaad 350 Milyan oo Doollar ah lagu guuleystay. Waxaan ugu baaqayaa Dawlad Goboleedyada inay si deg deg ah u maal-gashadaan Qorshahan. Isla markaana, waa in aan diiradda saarno mudnaanta sharciga ah ee Soomaalida si loo horumariyo mustaqbalka fog, sida ka muuqata Qaab-dhismeedka Soo-kabashada iyo Adkeysiga iyo u diyaargarowga Qorshaha Cusub ee Horumarinta Qaranka.

Marwo Madaxwayne,

Ku dhawaad sideed bilood ayaa ka soo wareegatay 1dii Janaayo, markaas oo ay hay’adaha Qaramada Midoobay gilgileen weerar hoobiye ah oo lagu weeraray xarunteena Muqdisho. Tan iyo maalintaas, waxaan sameynay horumar la taaban karo si aan kor ugu qaadno badqabka iyo ammaanka shaqaalaha Qaramada Midoobay. Ammaanka shaqaalaha iyo daryeelka shaqaaluhu waxaan sii doonaa mudnaantayda inta aan xilka hayo.

Ii oggolow in aan ku xigeenkayga, Raisedon Zenenga, u qiro kaalintiisa hoggaamineed bilihii adkaa ee ka horreeyay imaatinkaygii. Waxaan sidoo kale u mahadcelinayaa Xafiiska Qaramada Midoobay Uqaabilsan Taageerada Soomaaliya sida joogtada ah ee ay u caawiyaan AMISOM, Ciidanka Qaranka Soomaaliyeed iyo Hay’adaha Qaramada Midoobay ee ku howlgala Soomaaliya.

Marwo Madaxwayne,

In la helo nabad iyo xasillooni waarta oo ka dhalata waddan la soo deristay dhibaatadii iyo qalalaasihii ay Soomaaliya soo martay dhowr iyo tobankii sano ee la soo dhaafay oo kale waxay u baahan tahay dulqaad iyo dhabar adeeg. Iyadoo ku tiirsan taageerada joogtada ah ee Golahan, iyo guud ahaan beesha caalamka, UNSOM waxaa weli ka go'an tahay inay Soomaalida ka caawiso geedigooda ku wajahan mustaqbal nabad iyo barwaaqo leh.

Mahadsanidiin